



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 025/2009

Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Midooway oo soo dhoweeyey Qabsoomida Shirka Labaad ee Guddiga Wadajirka ee Arrimaha Nabadgelyada ee ka Dhacay Mogadishu

Nayroobi, 12 Agoosto 2009 - Ergayga gaarka ah ee Qaramada Midooway ee Soomaaliya Axmedu Ould-Abdallah ayaa soo dhoweeyey qabashada shirka Labaad ee Guddiga Wadajirka Arrimaha Nabadgelyada ee ka dhacay Mugadishu loolana jeedo in wax looga qabto laguna hormariyo arrimaha Nabadgelyada Soomaaliya.

Shirkani waa shirkii labaad ee Guddiga Wadajirka ee Arrimaha Nabadgelyada ay ku qabsadaan Mogadishu waxaana ka soo qeybgalay dhamaan xubnihii Guddiga oo dhan haddii ay ahaan lahaayeen Soomaali iyo Saaxiibadooda ka socda Bulshada Caalamkaba (Sida Ururka Midowga Africa, Kan Jaamaca Carabta, Kan Ururka Midowga Yurub, Kan Ergada Reer Yurub iyo Qaramadda Midoowayba).

Shirka Maanta dhacay wuxuu diirada saaray arimo badan oo ay ka mid yihiin xaaladaha quseeya Amaanka ee dhowaan dalka ku soo siyaaday, Dhisida Guddiyo Farsamo oo howlgala iyo arimo kaleeto oo loola danleeyahay in lagu taageero Hay'adaha Amniga Soomaaliya. Shirka waxaa la filayaa in ay ka soo baxaan dhowr talaaboyim dibna loogu xoojinaayo Hay'adaha Nabadgelyada Soomaaliya, gaar ah dib u dhiska iyo Manhajkooda.

Sida uu qabo Heshiiskii Jabuuti iyo Qodobada uu ku fadhiyeyba Guddiga Wadajirka ah ee Arrimaha Nabadgelyada waxaa uu mas'uul ka yahay isku xirka howsha Xukuumada iyo tan Saaxiibada Bulshada Caalamkana si lo dhiso loona hagaajiyo sida ugu haboon ee Farsamo ahaan loogu diyaariyo Arrimaha Nabadgelyada iyo Xasiloona Soomaaliya.

Kulamada Guddiga waxay u qabsoomi doonaan si joogto ah ugu dambeyntiina wuxuu wax ka qaban doonaa isbedelada ku lugta leh dhinaca Arrimaha Nabadgelyada iyo sidii loo samayn lahaa Sharciga iyo Kala dambeynta.